# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

**_DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA_**

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 2 aad Garoowe, 23 Janaayo 2000 **Lam. 1**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA**

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


## TUSMADA


### Qaybta Koowaad

### Sharci

- **Sharci Lam.** 1 ee 23/01/2000, kuna saabsan nabadgelyada guud — Bogga. 1
- **Sharci Lam.2** ee 23/01/2000, kuna saabsan Horumarinta Daaqa — Bogga. 10
- **Sharci Lam.3** ee 23/01/2000, kuna saabsan dhulka Beeraha — Bogga 15
- **Sharci Lam. 4** ee 23/01/2000, kuna saabsan Anshaxa Falimada — Bogga. 21
- **Sharci Lam. 5** ee 23/01/2000, kuna saabsan Wakaalada W/ (PUNA. — Bogga. 24

### Qaybta Labaad

### Xeer

- Xeer sharci Madaxweyne L.1 ee 5 Jannaayo 2000 kuna saabsan masuulnimada Wasaarada cadaaladda ee garsoorka Puntland — Bogga. 28

### Qayta Saddexaad

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

*OFFICE OF THE PRESIDENT*

**—SHARCI No: 1** **Janaayo 5, 2000**

# *SHARCIGA NABADGELYADA GUUD*

## QAYBTA KOWAAD
## NIDAAMKA GUUD
### Madaxa 1aad
### Hay'adaha Nabadgelyada iyo Waajibaadkooda
#### Qodobka 1aad
#### Macneyn Hub

Marka laga hadlaayo Sharcigaan waxaa Hub loola jeedaa:

1st)Hubka qarxa oo nooc walba leh iyo saanadiisa;

2nd)Bombada gacanta oo nooc walba leh, miinada, baaruuda, waxkasta oo qarxa iyo qaybaha qalabka laga sameyn karo Hub;

3rd)Hubka wax muda ama wax gooya iyo qalabka kale ee loo sameystay in wax lagu dilo, wax lagu dhaawaco ama wax lagu handado;

4th)Hubka waaweyn: waxaa loola jeedaa: hubka waaweeyn ee gaadiidka la saaro; kan dhulka lagu rakibo, sawaariikhda lidka diyaaradaha iyo taangiga, boobeyaasha oo nooc walba leh, qoryaha yar-yar ee silsiladaha leh iyo kuwa aan sharqabin (sarqamin) iwm.

5th)Hubka khatarta ah: waxaa loola jeedaa, hubka ku xusan xarafka b) ee qodobka 9aad.

6th)Hubka loo aqoonsan yahay isdifaaca nafta iyo maalka waxaa loola jeedaa hubka (individual) ee qof keliya isticmaalo sida:

1. Qoriga faalka G3 iyo saanadisa oo aaney wehelin buumbo-faal iyo silsiladaha.
2. Qoriga A.K. iyo kuwa la mid ka ah.
3. Bastooladaha nooc kasta oo ay yihiin.

#### Qodobka 2aad
#### Madaxda Nabadgelyada Guud

Marka laga hadlaayo Sharcigaan waxaa loo aqoonsan yahay Madaxda Nabadgelyada:

1st)Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Dadweynaha oo uu hoos imaanayo Ciidanka Boliiska oo u xilsaaran fulinta Sharciga iyo gacan ku haynta Nabadgelyada Guud ee Dalka Puntland;

2nd)Guddoomiyeyaasha Gobollada oo ay hoos imaanayaan Talisyada Qaybaha Boliiska iyo Fadhiyada Daraawiishta, fadhiyada Ciidanka Asluubta, wixii la xiriira arrimaha nabadgelyada iyo amniga Gobollada;

3rd)Guddoomiyeyaasha (Duqawda) Degmooyinka oo ay hoos imaanayaan Saldhigyada Boliiska iyo Fadhiyada kale ee Boliiska Degmada;

#### Qodobka 3aad
#### Waajibaadka Madaxda Nabadgelyada Guud

Marka laga hadlaayo Sharcigaan, Madaxda Nabadgelyada Guud waxaa waajib ku ah inay:

1) Hubiyaan dhawrista habsami u socodka Amniga, Xasiloonida iyo Nabadgelyada Guud;

2) Si sharci ah u dhaqangeliyaan ka hortagga dembiyada, anshax-xumida iyo soo qabashada dembiilayaasha, dacwad oogista iyo u gudbinta eedeysanayaasha hay'adaha garsoorka ee ku shaqada leh;
3) Uruuriyaan wararka iyo xogta la xiriirta Amniga Guud iyo xasiloonida, curyaamintа dhaqaalaha iyo cashuur la baxsiga;
4) Hubiyaan habsami u hirgelinta Sharci Lr.4 ee 14/3/1999 ee mamnuucaya in laga ganacsado waxyaabaha halista ku ah aayaha Dalka sida: dhoofinta dhuxusha, dhirta qoyan, xoolaha dhadig, dhoofinta hilibka xoolo yaryar ama xoolo dhedig oo la qalay, keenista iyo ka ganacsiga cunto dhacday, daawo dhacday, maandooriyeyaasha, bacaha, cajaladaha (maqal iyo muuqaalba), buugagta, filimada, sawirada ee liddiga ku ah Diinta iyo dhaqanka Dalka.
5) La socdaan, kontoroolaan, Hubiyaan ujeeddooyinka, tirada, baaxadda dadka ka soo gelaaya xuduudaha wadamada aan dariska nahay iyo Gobollada kale ee Soomaaliya ama ka baxaaya xuduudaha Dalkeena;
6) Si deg-deg ah ugu gurmadaan musiibooyinka guud iyo gaar-haaneed;
7) Haddii codsi kaga yimaado dhinacyada ay khusayso ama loo arko xafiis ahaan lagama maarmaan, inay dhexdhexaadiso kana dhaliso maslaxad dadka muran ama collaadu dhextaalo;
8) kaashadaan Madaxda kale, si loo xaqiijiyo dhowrista shareecadda, qawaaniinta iyo awaamiirta ay soo saaraan Madaxda Sare ee Dawladda.

**Qodobka 4aad**

**Awaamirta Madaxda Nabadgelyada**

Madaxda Nabadgelyada waxay soo saari karaan ayagoo dhowraya xadka qaanuunku uu jideeyey, awaamirta loo baahan yahay oo aan looga maarmin fulinta waajibaadka ku xusan Qod. 1aad ee Sharcigaan.

**Qodobka 5aad**

**Dhaqan-gelinta Awaamirta Madaxda Nabadgelyada**

Awaamirta Madaxda Nabadgelyad waxay leeyihiin awood fulineed oo deg-deg ah, ciddii ka hortimaada waxaa la horgeynayaa maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 6aad**

**Ruqsada Madaxda Nabadgelyada**

6.1 Ruqsada ay bixiso Madaxda Nabadgelyada waa mid shakhsi ah, la isumana gudbin karo.

6.2 Haddii aan si kale amar looga bixin muddada Ruqsaduhu ay socon karaan waa 1 (hal) sano laga bilaabo maalinta la bixiyey.

**Qodobka 7aad**

**Kala Noqosho ama ka joojin Ruqsad**

7.1 Ruqsadda waa lagala noqon karaa haddii qofka la siiyey uu fulinwaayo shuruudihii lagu siiyey dhammaan ama qaar ka mid ah;

7.2 Sidoo kale waa lagala noqon karaa Ruqsada qofkii la siiyey markii ay ku yimaadaan ama lagu ogaado inay la kulmeen sababaha lagu diidi karo Ruqsadaha;

7.3 Waxaa kaloo lagala noqon karaa Ruqsada ama laga joojin karaa wakhti kasta markuu xadgudub sameeyo qofka la siiyey ama wakiilkiisa;

7.4 Ruqsadaha waxaa la noqon kara, joojin kara hay'addii nabadgelyo ee awal bixisay ama hay'adaha nabadgelyada ee maamul ahaan ka sareeya;

## Qodobka 8aad
## Awoodda gelista meelo cayiman

Marka ay jirto baahi deg-deg ah, Madaxda Nabadgelyada iyo saraakiisha Boliiska waxay awood u leeyihiin inay galaan wakhti kasta goobaha loogu talagalay ganacsiga ee u baahan Ruqsad si looga Hubiyo dhaqan-gelinta sharciyada iyo xeerarka, iyadoo loo raacayo nidaamka uu qoriyo habka ciqaabta qodobka 58.

## QAYBTA LABAAD
## HUBKA
## Qodobka 9aad
## Mamnuucidda Ka Ganacsiga, Keenista iyo Dhoofinta Hubka

9.1 Dalka Puntland, marka laga reebo baahida Ciidamada Amniga, waxaa ka mamnuuc ah ka ganacsiga, uruursiga, sameynta, dhoofinta iyo keenista Hubka ku xusan xarfaha A iyo B ee Qodobka 9aad;

9.2 Qof kasta ee ku xadgudba mamnuucidda farqadda hore ee Qodobkaan waxaa lagu ciqaabayaa xarig labo (2) sano ilaa shan (5) sano ah ama ganaax lacageed oo ah Sh.So. 3,000,000-10,000,000.

9.3 Hubka sharci darada ah ee la qabto iyo gaadiidka (dhul, bad iyo cir) ee loo isticmaalo dhaqdhaqaaqa Hub sharci daro ah waa lala wareegayaa.

9.4 Mamnuucidda ka ganacsiga hubka ee ku xusan farqadaha 1aad, 2aad iyo 3aad ee qodobkaan ma samaynayso: dadka dan yarta ah ee haysta nooca hubka ee loo oggol yahay shacabka ee ku qeexan xarafka f) ee qodobka 9aad ruqsada haysto ama yuusan haysan ee (sida reer miyiga) ee u baahdo inuu qorigiisa/bastooladiisa ama saanadooda iibsado waa u banaan tahay, waxaase khasab ku ah in lala socodsiiyo madaxda nabadgelyada ee ku shaqada leh si qofka cusub loogu wareejiyo ruqsada huba loo haystay ama ruqso loogu sameeyo.

## Qodobka 10aad
## Qarameyn Hubka Waaweyn iyo Kan Khatarta ah

10.1 Iyadoo la fulinaayo Qod. 13.5.i Axdiga Dawlad Goboleedka Puntland, si loo sugo amniga, nabadgelyada guud iyo xasiloonida **waxaa la qarameeyey:**

1st)Dhammaan hubka waaweyn ee gaadiidka la saaro iyo gaadiidka Dawladda ee uu saaran yahay; kan dhulka lagu rakibo; sawaariikhda oo dhan yar iyo weyn; hubka lidka dayuuradaha iyo taangiyada, boobeyaasha oo nooc walba leh; qoryaha yar-yar ee silsilidda leh iyo kuwa aan sharqabin (sarqabin).

2nd)Dhammaan bambooyinka nooc kasta leh, miinooyinka, baaruuda, wax kasta oo qarxa iyo qaybaha qalabka laga sameyn karo Hub qarxa ee sida sharci-darada ah loo haysto.

10.2 Xukuumadda waxaa awood loo siiyey inay la wareegto Hubka la qarameeyey ee ku xusan farqadda 1aad ee qodobkaan iyo inay soo saarto Xeer-Madaxweyne ee lagu faahfaahinayo: qaabka, sifaalaha iyo wakhtiga la wareegidda.

10.3 Laga bilaabo taariikhda Sharcigaanu dhaqan-galo, waxaa laga mamnuucay Dalka Puntland in shacbigu haysto Hubka ku xusan farqadda hore ee qodobkaann, waxaana Xukuumadda awood loo siiyey inay deg-deg kula wareegto;

10.4 Qof kasta oo aan u hogaansamin nidaamka qodobkaan oo qariya Hubka la qarameeyey sida ku cad farqadda 1aad ee qodobkaan, isagoo kala dhuumanay xukuumadda oo aan ku soo

iyo ganaax lacageed ee u dhigma (leeg) qiimaha Hubka uu qariyey oo hadduu bixin waayo loogu bedelidoono xabsi.

## Qodobka 11aad
## Habaynta Haysashada Hubka yaryar

11.1 Iyadoo la tixgelinaayo marxaladda kala guurka iyo inta laga dhalinayo jawi nabadgelyo ee lagu kalsoonaan karo mabda'ahaan haysashada iyo sidashada Hubka yaryar ee lagama maarmanka u ah difaaca nafta iyo maalka kana baxsan mid ka la qarameeyey waa la oggolyahay, waxaana lagu haysan karaa meelaha iyo sifaalaha soo socda:-

1st)Goobaha ganacsiga oo dhan, meheradaha (profisional) kala duwan, guryaha la deganyahay, xurumaha shirkadaha, ururida wadaniga ah, ururada shisheeye iyo hay'daha caalamiga ah iwm, waxaa loo oggolyahay haysashada Hubka yaryar tiro iyo nooc hadba inta lagama maarmaan u ah difaacidda naftooda iyo maalkooda hadii ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

1. Inay ka diiwaan-geliyaan Hubka ay haysataan Xafiisyada Madaxda Nabadgelyada ee deegaamadooda kana codsadaan Ruqsada haysashada;
2. Inay bixiyaan cashuurta ka waajibtay bixinta Ruqsada;
3. Inaan goobahooda la dhigin Hub kale oo aan ruqsa lahayn;
4. Inaan Hubkooda dibedda loola bixi karin, lala dhexmari karin magaalada loo wareejin karin goob ka baxsan meesha loogu qoray Ruqsada haddaan fasax looga helin Madaxda Nabadgelyada ee Ruqsada bixisay.

B) Baabuurta xamuulka ee isaga gooshta wadanka dhexdiisa waxaa loo oggolyahay Hub ku filan daafacaadda dadka iyo maalka ay sidaan, waana inay buuxiyaan shuruudaha ku xusan xarafka hore ee qodobkaan lambarada 1-3 iyo marka ay joogaan magaalooyinka ama dhexmarayaan inay Hubkooda qariyaan.

C) Miyiga oo dhan iyo meelaha ka baxsan magaalooyinka Hubka yaryar oo lagama maarmaanka u ah daafacaadda nafta iyo maalka kana baxsan Hub la qarameeyey waa la haysan karaa shuruud la'aan iyo Ruqsad la'aan marka laga reebo:

1.- Inaan lala soo gelin magaalooyinka Hubka miyiga lagu haysto.

2- Inaan wadooyinka la isla dhextaagin lana dhawro amniga dadka kale.

## Qodobka 12aad
## Ilaaliyeyaasha Gaarka ah

12.1 Shirkadaha, Warshadaha, Hoteelada, Hay'adaha caalamka, Ururada Samafalka IWM waxay awood u leeyihiin iyadoo la tixgelinaayo baahidooda inay sameystaan ilaaliyeyaal gaar ahaaneed ee u ilaaliya naftooda, xoolahooda iyo hantidooda ma guurtada ah.

12.2 Ilaaliyeyaasha ku cayiman farqadda 1aad ee qodobkaan waxaa la siin karaa Hub wakhtiga ay shaqada hayaan, waxaase lagama maarmaan ah in ilaaliyeyaashooda ay u dhan tahay shuruudaha lagu bixiyo Ruqsada Hubka.

12.3 Ilaaliyeyaasha gaar ahaaneed waxay la bisan karaan Dhar iyo calaamooyin u gaar ah oo uu oggolaaday Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Dadweynaha, isla markaasna waa inay haystaan xaashida aqoonsiga ee uu bixiyey Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga, ka dib markay buuxiyaan shuruudaha farqadda 2aad ku xusan.

## Qodobka 13aad
## Ruqsada Haysashada Hubka

13.1 Guddoomiyeyaasha Maamulka ee Gobollada waxaa loo oggolyahay inay siiyaan shaqaabka degan xadkooda iyo hay'adaha ku xusan qodobka 13aad ee soo codsada

Hubka loo aqoonsaday isdifaacidda nafta iyo maalka ee ka baxsan noocyada la qarameeyey ee ku cayiman qodobka11aad farqadiisa 1aad.

13.2 Guddoomiyaha Maamulka Gobolka, waxaa khasab ku ah inuu 15 maalmoodba halmar soo gaarsiiyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga liiska ruqsooyinka Hub ee uu bixiyey, noocayada, lambarada, magacyada dadka la siiyey oo sadexan iyo maheradooda, si loo ansixiyo looguna sameeyo buugagga Ruqsada haysashada Hubka oo bixintiisa Wasiirku iska leeyahay ama ciddii uu u wakiisho.

13.3 Guddoomiyaha Maamulka Degmada (Duqa), waxaa loo oggolyahay inuu siiyo dadka degan xadkiisa ee soo codsada Ruqsada sidashada magaaladaa dhexdeeda Hubka wax gooya ama wax mudda ee ku xusan xarafka (C) ee qodobka 9aad. Ku haysashada Hubkaas gurigiisa, qofna ugama baahna Ruqsad cidna.

13.4 Dadka sameeya Hubka wax muda ama wax gooya iwm waxaa khasab ku ah inay ka qaataan Ruqsad qoran Guddoomiyaha (Duqa) Maamulka deegaankooda.

13.5 Bixinta Ruqsada ku xusan lambarka 4aad ee qodobkaan, waa laga dhaafay cashuurta Ruqsada, wax shuruud kale ahna laguma xiri-karo oo aan ka ahayn xagga shuruudo la xiriira dhowrista amniga.

## Qodobka 14aad
## Mamnuucid Sidasho Hub Magaalooyinka Dhexdooda & Jidadka Isku Xira Deegaanada

14.1 Marka laga reebo Ciidamada Nabadgelyada Dalka waxaa mamnuuc ah:

One)In lala dhexmaro Hub nooc kasta ha ahaadee magaalooyinka iyo tuulooyinka Dalka Puntland oo dhan.

Two)In jidadka waaweyn ee isku xiriiriya deegaanada Puntland iyo kuwa ina xiriiriya Wadamada iyo Gobollada aan dariskanahay, Hub lala dhex istaago, lala dhexmaro, isbaaro la dhigto ama la sameeyo jawi cabsi iyo khatar nabadgelyo-xumo ku abuuri-kara socdaalada.

14.2 Ciidamada Nabadgelyada marka ay gudanayaan waajibaadkooda waxaa khasab ku ah, labiska iyo calaamooyina lagu yaqaan ka sakow, inay sitaan warqadahooda aqoonsiga ah ayna tusiyaan cid kasta ee ay ku fulinayaan hawl ama weydiisata.

14.3 Qof kasta ee ku xadgudba mamnuucidda farqadda hore ee qodobkaan waxaa lagu ciqaabayaa xarig 1(hal) ilaa 2 (labo) sanadood ah iyo ganaax lacageed oo dhan Sh. So. 500,000 ilaa Sh. So. 5,000,000 Hubka lagu helo oo laga dhaco iyo haddii uu Ruqsad haystay oo lagala noqdo.

## Qodobka 15aad
## Mamnuucid Xirasho Labis Askareed, Calaamooyin & Ambaleemo

15.1 Waa ka mamnuuc cid kale inay xirato, lala dhexmaro magaalooyinka, tuulooyinka, jidadka isku xira deegaanada iyo meelaha dadka u furan:

One)Labiska, calaamooyinka, ambaleemooyinka iyo astaamaha kale ee u gaarka ah Ciidamada Nabadgelyada Dalka Puntland ama ilaaliyeyaasha hay'adaha Ruqsada u haysta.

Two)Labiskii, calaamooyinkii iyo abaleeemooyinkii ay lahaan-jireen Ciidamadii hore ee Soomaaliya, jamhadeed ama u keeni kara dhibaato habsami u socodka nabadgelyada iyo xasiloonida dadweynaha.

## QAYBTA SADDEXAAD
## TAHRIIB
### Qodobka 16aad
### Mamnuucidda Tahriibka

16.1 Dalka Puntland, waxaa ka mamnuuc ah, in laga abaabulo, looga baxo habka socdaal ee loo yaqaan: **Tahriib** iyo inay soo galaan, dhexmaraan dad ujeeddadoodu tahay inay ogga dhoofaan Tahriibnimo.

16.2 Ciidamada Nabadgelyada ee ku sugan xudduudaha laga soo galo Dalka, baraha koontoroolada waxaa awood loo siiyey inay baaraan, Hubiyaan ujeeddooyinka dadka soo gelaaya, dib ugu celiyaan meeshii uu ka yimid qof kasta oo ay u caddaato inuu ujeeddo Tahriib u socdo.

16.3 Ciidamada Nabadgelyada ee ka hawl-gala xeebaha iyo magaalooyinka la tuhunsan yahay inuu Tahriibku ka dhoofo, waxaa awood loo siiyey inay baaraan meel kasta ee lagu tuhmo abaabul Tahriib, qabtaan cidkasta ee ku lug yeelata iyo gaadiid kasta oo dhuleed ama badeed ee loo isticmaalayo daabulid Tahriib.

16.4 Dadka lagu qabto Tahriibnimada waxaa dib loogu celinayaa meelihii ay ka yimaadeen iyadoo kharajka la saari-doono abaabulayaasha safarkooda, dulaaliinta, mulkiilayaasha gaadiidka soo geliyey Dalka ama loo isticmaalay daabulidda.

16.5 Qof kasta ee isku daya, abaabusha, dulaal ka noqda, ka ambabixiya socdaal Tahriibnimo, wuxuu mudandoonaa ciqaab xabsi ah 6 bilood ilaa 2 sano iyo ganaax lacageed ee dhan Sh. So. 1,000,000 ilaa Sh. So. 5,000,000 iyo weliba bixinta kharajka dib loogu celinaayo Tahriibayaasha.

16.6 Tahriibayaasha waantoomi-waaya oo mar labaad la soo qabto waa la xirayaa, waxaan la horgeynayaa Maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwadooda.

16.7 Gaadiidka loo isticmaalay dhaqdhaqaaqa iyo daabulidda Tahriibka oo ay ku cadaato waa lala wareegayaa.

## QAYBTA AFARAAD
## HUTEELADA
### Qodobka 17aad
### Diiwaanada Huteelada

17.1 Dadka ijaara Huteelada iyo meelaha la seexdo ee ay yaalaan sariiraha la kireeyo waxaa khasab ku ah:-

Koow) In ay haystaan diiwaan lagu qoro: magaca, da'da, halka uu ka yimid, dhalashada, ujeedada socdaal iyo meesha uu u socda qof kasta oo sariir ka ijaaranaya, qofkii aan aqoonsi haysan lagama ijaari karo huteelka.

Labo) In ay subax kasta u gudbiyaan Madaxda Nabadgelyada Degmada iyo Saldhigga Boliiska ee ugu dhow, liiska dadka sariiraha ka ijaartay 24 saac ee la soo dhaafay oo ay ku dhanyihiin macluumaadka ku cayiman xarafka a) farqadda hore ee qodobkaan.

17.2 Diiwaankaas waxaa khasab ah in la tuso Madaxda Nabadgelyada iyo Saraakiisha Ciidamada Nabadgelyada marka ay gudanayaan waajibaadkooda.

## QAYBTA SHANAAD
## MAS'UULIYAD KA REEBID IYO XUQUUQ
### Qodobka 18aad
### Mas'uuliyad ka reebid iyo Xuquuq

18.1 Sharcigaan wuxuu jidaynayaa:

One)Xubnaha Ciidamada Nabadgelyada ee gudanaaya waajibaadkooda ku xusan Sharcigaan ama sharci kasta oo kale ama fulinaaya amar xaq ah oo ka soo baxay Madaxda Nabadgelyada, Maxkamadaha ama hay'adaha kale ee awoodda u leh wixii falalkooda isticmaalid xoog ama Hub dhibaato ka yimaada: dhimasho, dhaawac, burburin ama khasaaro dhaqaale waxaa laga reebay mas'uuliyaddii ciqaabeed ama magdhow madani ah ee ka dhalan lahaa falalkaas, lagumana soo oogi-karo dacwad ciqaabeed, Idaari ama Madani midna.

Two)Xubinta ka tirsan Ciidamada Nabadgelyada ee ku geeriyoota iyadoo gudaneysa waajibaadka ku xusaan firqadda hore, Dawlad Goboleedka Puntland ayaa ka faalo-qaadaysa aayaha qoyskiisii ee loo aqoonsan yahay inuu ka kooban yahay caruurtiisa yaryar iyo haweenka uu qabo, waxaana la siinayaa xaq fara qabsi ah iyo mushaarkiisii oo dhan ilaa caruurta kan ugu da' yar ka qaangaaro ama labada waalid ka noolyihiin.

Three)Xubinta Ciidamada Nabadgelyada ee uu ka soo gaaro waajib-gudashada ku xusan xarfaha a) iyo b) ee qodobkaan dhaawac ka dhiga naafo joogta ah waxaa la siinayaa mushaarkiisii oo dhan inta uu ka nool yahay, wuxuuna xaq u yeelanayaa daaweyn, hooy iyo hormar wixii ay helaan xubnihii la darajada ahaa.

18.2 Mas'uuliyed ka raabidda iyo xaquuqda ku xussan qod. Farqadiisa 1aad; waxaa kaloo yeelanayaa qof kasta oo madaxda nabadgelyada ama Ciidanka Nabadgelyada aysi xaq ugu codsadaan kalana hawl-gala gudashada waajibaadkooda ku tilmaaman ku tilmaaman farqadda 1aad oo isagoo ku dhex jira fulinta hawlahaas dhibaato ku geysta ama loogu geysto.

## QAYBTA LIXAADQODOBO KALA DUWANQodobka 19aad

**Ku Xadgudubyada aan ciqaab loo Cayimin**

**Iyadoo aan wax loo dhimin ciqaabaha ka sii culus ee ku xusan sharci kasta oo kale, qof kasa ee ku xadgudba qodobada uu Sharcigaanu qoraayo ee aan loo cayimin ciqaab, waxaa lagu ciqaabayaa xarig dhan 6 bilood ilaa 2 sanadood ama ganaax lacageed oo dhan Sh. So. 1,000,000 ilaa 2,000,000.**

### Qodobka 20aadQabashada iyo Baarista

**Qabashada (xiridda), baarista, maxkamad horgeynta dembiyada laga gelo Sharcigaan waxaa loo raacayaa nidaamka uu qorayo Sharciga habka ciqaabta.**

### Qodobka 21aadMaxkamadda Awoodda u leh

**Dembiyada laga gelo Sharcigaan Maxkamadaha Darajada 1aad ayaa awood u leh dacwad qaadistooda.**

### Qodobka 22aadXeer-Nidaamiye

**Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahindoono laguna hirgelindoono Sharcigaan, isagoo tixgelinaaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Amniga Dadweynaha.**

### Qodobka 23aadBurin

**Waxaa la buriyey sharci iyo xeer kasta ee ka soo horjeeda ama aan la socon karin**

Qodobka 24aadDhaqan-gal

**Sharcigaan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu oggolaado Golaha Wakiilada uuna saxiixo Madaxweynaha.**

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxwenaha Dawladda Puntland

Garoowe, Janaayo 5, 2000